# WIC Xuquuqda Bukaanka iyo Masuuliyadaha

Waxaan helay macluumadka xuquuqahayga iyo masuuliyadaha sidii ka qayb galaha WIC. Waxaan fahmay inaan xaq u leeyahay inaan:

- *Helo daawayn xaq ah oo ixtiraamleh laga bilaabo shaqaalaha WIC iyo shaqaalaha dukaanka boosharigа.*
- *Hayo macluumaadka aan siiyay shaqaalaha WIC inuu gaar ahaado. Looma shaacin karo cid ka baxsan dibada Barnaamijka WIC oggolaansho la'aan.*
- *Helo waxbarashadda nafaqada iyo macluumaadka ku saabsan daryeelka caafimaadka iyo adeegyada kale ee caawimada badan.*
- *Isticmaaaho dukaanka boosharigа ama farmasiiga Gobolka New York ee loo oggolyahay inuu aqbalo WIC.*
- *Helo xidhmada cuntadda ee ku habboon baahiyaha nafaqada, ama kuwan ilmahayga.*
- *Waydiiyo wareejinta wakaalada kale ee WIC.*
- *In qoraal ahaan la sheego marka iyo sababta dheefahayga barnaamijka WIC ay u dhammaan doonto.*
- *Waydiiyo dhegaysi xaq ah haddii aanan aqbalin go'aamada ku saabsan u qalmidayda.*

Macluumaadka aan siiyay si loo arko haddii aan u qalmo Barnaamijka WIC waa sax, ilaa inta ugu wanaagsan aqoontayda. Waan fahmay taas:

- *Barnaamijka Caawimaada Daryeelka Carruurta (New York State WIC Program) ayaa oggolaan kara faafinta xogtayda WIC oo lala wadaagaayo barnaamijyada qaar ee caafimaadka iyo waxbarashada sida Medicaid, SNAP, TANF, iyo Child Care Assistance Program. Macluumaadka noocan ah waxaa isticmaali doono hay'adaha Gobolka iyo deegaanka iyo hay'adaha dadweynaha kaliya haddii ay bixiyaan barnaamijyada u shaqeeya dadka u qalma barnaamijka WIC. Barnaamijyadaan ayaa u adeegsan kara xogtaan ujeedooyinka soo socda: si loo go'aansho u qalmidaydayda barnaamijyadooda; inay i siiyaan xog ku saabsan barnaamijyadaas loona fududeeyo hanaanka codsiga; si kor loogu qaado caafimaadkayga, waxbarashada, ama faya qabka haddii aan horey uga diiwaan gashanaa barnaamijyada; iyo si loo xaqiijiyo in baahiyahayga caafimaadka la buuxsho.*
- *Shaqaalaha Barnaamijka WIC waxay hubin karaan macluumaadka aan siiyay iyaga si ay u arkaan inuu sax yahay. Waxay la xidhiidhi karaan maamulahayga shaqada ama ilaha kale ee dakhligayaga. Waxay ka heli karaan diiwanadayda cashuurta Waaxda Cashuurta iyo Maaliyada NYS. Marka go'aan laga gaadhayo haddii aan ka qayb geli karo WIC, ma waydiiyaan macluumaadka wax ka badan 12 bilood ka hor inta aanan codsan. Haddii ay raadinayaan inay arkaan haddii sharciyada WIC la jebiyay, waxay codsan karaan macluumaadka muddo kasta muddada lagu jiray taas oo aan helay dheefaha WIC.*
- *Waa inaan ku wargeliyaa wakaalada maxaliga ah ee WIC haddii aan qorsheeyo inaan guuro, isbeddelada dakhliga ee qof kasta oo qoyskayga ah, ama haddii aan doonayo inaan u beddesho wakaalad kale oo maxali ah oo WIC ah.*
- *Haddaan runta sheegi waayo ama aan qariyo macluumaadka ujeedada si aan u helo dheefaha WIC, waxaan dib u siin doonaa Gobolka dheefaha aanan u qalmin. Waxaa sidoo kale Gobolka New York uu igayn doonaa maxkmadda ama saraashiisha federaalka.*
- *Waxaan keliya iska diiwaangelin karaa hal Barnaamij oo WIC oo keliya. Waxaan xaqiijinayaan inaanan hadda ka diiwaangashanayn Barnaamij kale oo WIC ah.*
- *Cuntooyinka WIC waxaa keliya loogu talo galay xubinta qoyska diiwaanka gashan. Ma iibin karo, ama uma soo dhigi karo iib, ama ma bixin karo dheefaha WIC qaabnaba.*
- *Haddii xidhmadayda cuntadda ay u baahantahay in la beddelo ama la joojiyo wakhti gaaban, waxaan waci doontaa wakaaladayda maxaliga ah ee WIC.*

Waxaan ogsoonahay in Wakaalada maxaliga ah ee WIC ay ii diyaarin doonto adeegyada caafimaadka iyo waxbarashadda nafaqada aniga, oo waxaa la igu dhiirigelinayaa inaan ka qayb qaato adeegyadan.

Waxaan ogsoonahay in sharciyada u qalmida iyo ka qayb galka Barnaamijka WIC ay isku mid yihiin qof kasta, iyaddoon loo eegin isirka, midabka, asalka qaranka, da'da, curyaanimada, ama sinjiga.

*sii socda* →

NEW YORK STATE | Department of Health

**Codsashada Dhegaysi Xaq ah**

Haddii codsigaaga dheefaha la diiday ama dheeftaada la joojiyay, waxaad leedahay xaqa dhegaysiga xaqa ah. Dhageysiga xaqa ah waa fursad aad u leedahay inaad garsoore u sheegto sababta aad ugu malaynayso go'aanku inuu khaladyahay. Waxaad waydiisan kartaa dhegaysi gudaha 60 maalmood marka codsigaaga la diiday ama marka laguu sheegay dheefahaagu inay joogsan doonaan. Haddii aad ku waydiin waydo 60 maalmood, waxaad waayi doontaa dhegaysiga xaqa ah.

Muddada caddaynta waa ilaa inta aad heli doonto dheefaha WIC. Haddii dheefahaaga la joojiyo badhtanka muddada caddaynta oo aad waydiisato dhegaysiga gudaha 15 maalmood, dheefahaaga WIC way sii socon doonaan ilaa dhegaysiga natiijadiisa la ogaado ama ilaa dhammaadka muddada caddaynta, ku kasta oo soo hor dhaca. Waydii dhegaysiga Wakaalada maxaliga ah ee WUC (shaqaalaha waxay ku caawin doonaa adiga) ama la xidhiidh Barnaamijka NYS WIC.

| | | | |
|---|---|---|---|
| boostadda: | WIC Program Director<br>NYSDOH, Riverview Center<br>150 Broadway, 6th Floor<br>Albany, NY 12204 | telefoonka:<br>fagas:<br>iimaylka | (518) 402-7093;<br>(518) 402-7348; ama<br>NYSWIC@HEALTH.NY.GOV |

**Tani waa warbixinta caddaynta aan ku saxeexay nidaamka kombuyuutaka ka hor inta aanan helin dheefaha:**

Waxaa la ii sheegay xuquuqahayga iyo waajibaadyada waafaqsan Barnaamijka WIC. Waxaan caddaynayaa in macluumaadka aan bixiyay go'aankayga u qalmida uu dhammaystiranyahay oo sax yahay ilaa inta aqoontayda ugu wanaagsan. Macluumaadkan waxaa loo bixinayaa in la helo dheefaha WIC oo waxaan fahmaa in wakaalada gobolka iyo maxaliga WIC saraakiisha waxay hubin kartaa macluumaadka haddii baahidu ay soo baxdo addoo la xidhiidhaya loo shaqeeyayaasha ama ilaha kale ee dakhligayga, iyo/ama helida diiwaanadayda cashuurta ee NYS Waaxda Cashuuraha iyo Dhaqaalaha. Waxaan si gaar ah u oggolaanayaa shaacinta diiwanadayda cashuurta ee ka timid Waaxda Cashuuraha iyo Maaliyada NYS ujeedadan, taas oo ay ku jiri karto dhowr macluumaadka shaqada ah oo ay siiyeen loo shaqeeyayaashu Waaxda Cashuuraha iyo Maaliyada Gobolka New York waxa la xidhiidha Shaqaalaysiinta Cusub iyo Macluumaadka Ka warbixinta Mushaharka. Waxaan sidoo kale fahmay in si khaldan u metelka ula kaca ah uu ii horseedi karo dacwad oogis madani ama fal dambeiyeed oo waafaqsan sharciga gobolka iyo/ama federaalka. Si khaldan u metelka waxaa ku jira, laakiin kuma xadidna, in si ula kac ah loo been sheego, loo qariyo ama looga saaro dakhliga qoyska, cabbirka qoyska, xogta caafimaadka, heerka Medicaid iyo meesha la degenyahay. Waxaan sidoo kale fahmay in samaynta warbixin been ah ama marin habaabin ah ama si khaldan u metelka, qarinta iyo ka saarida xaqiiqooyinka ay keeni karto u qalmid la'aantayda oo waxay u baahan kartaa lacag bixinta qiimaha doolarka ee dheefaha WIC aan sida khaladka ah u helay iyaddoo loo eegin haddii aan ama aanan uga jeedin inaan si aan sax ahayn u helo dheefaha. Kama dambaysta, waxaan fahmay inaan iska diiwaangelin karo keliya hal Barnaamij oo WIC ah. Waxaan halkan caddaynayaa inaanan hadda ka diiwaangashanayn Barnaamij kale oo WIC ah. Waxaan codsanayaa in dheefaha aniga maanta la isiiyo.

Sida waafaqsan xeerka xaquuqda madaniga ee Federaalka iyo xeerarka iyo siyaasadda Waaxda Beeraha Maraykanka (USDA), hay'addan waa ka mamnuuc takoorid ku salaysan jinsiyad, midab, wadan, jinsi (uuna ku jiro aqoonsiga jinsiga iyo dookha galmada), naafada, da'da, ama aargoosi ama ciil qab la xariira tallaabo hore oo xaquuqda madaniga ah.

Xogta barnaamijka ayaa lagu fasiri karaa luuqado aan ahayn af Ingiriisiga. Dadka naafada ah ee u baahan qaabab kale oo xariir oo ay ku helaan xogta barnaamijka (tusaale, Farta indhoolka, far waawayn, cajalad cod ah, Luuqada Dhagoolayaasha ee Maraykanka), waa inay la xariiraan wakaalada gobalka ama deegaanka ee maamulaysa barnaamijka ama USDA's TARGET Center oo laga helaayo (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama ay kala xariiraan USDA Federal Relay Service lambarka (800) 877-8339.

Si aad u gudbiso cabashada takoorka barnaamijka, Cabtuhu waa inuu buuxiyaa Foomka AD-3027, foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA oo laga heli karo barta oonlaynka: **https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/USDA-OASCR%20 P-Complaint-Form-0508-0002-508-11-28-17Fax2Mail.pdf**, oo laga heli karo xafiis kasta oo USDA leedahay, ayagoo wacaaya (866) 632-9992, ama waraaq qoran u diraaya USDA. Waraaqda waa in lagu sheegaa magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka, iyo sharaxaada qoran ee falka takoorka laga cabanaayo oo si fiican loo faahfaahshay si loogu sheego Kaaliyaha Xoghayaha Xuquuqaha Madaniga ah (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xaquuqda madaniga ee dhacay. Foomka AD-3027 ee la buuxshay ama waraaqda waa in loogu diraa USDA:

(1 ) iimeel: Waaxda Beeraha ee Maraykanka
Xafiiska Caawiyaha Hayaha Xaquuqda Aaadanaha,( U.S. Department of Agriculture, Office of the Assistant Secretary for Civil Rights)
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;

(2) fakiska: (833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama

(3) iimeelka: program.intake@usda.gov.

Hay'adan waa bixiyaha fursadda loo siman yahay

Wixii cabashooyinka ah ama in la codsado Dhegaysi xaq ah la xidhiidh
(1 ) iimeel: WIC Program Director
NYSDOH, Riverview Center
150 Broadway, 6th Floor
Albany, NY 12204; or

(2) taleefanka: (518) 402-7093; fakiska (518) 402-7348; ama

(3) iimayl: NYSWIC@HEALTH.NY.GOV